

صورة مشرقة من حياة الصحابة رضي الله عنهم
Muuqaal ifaya oo ka mid ah nolosha asxaabta
-Ilaahay raalli haka noqdee-

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, kaasoo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:
(وَالسَّابِقُونَ الْأَوَّلُونَ مِنَ الْمُهَاجِرِينَ وَالْأَنْصَارِ وَالَّذِينَ اتَّبَعُوهُمْ بِإِحْسَانٍ
رَّضِيَ اللَّهُ عَنْهُمْ وَرَضُوا عَنْهُ وَأَعْدَّ لَهُمْ جَنَّاتٍ تَجْرِي تَحْتَهَا الْأَنْهَارُ خَالِدِينَ
فِيهَا أَبَدًا ذَلِكَ الْفُورُزُ الْعَظِيمُ)

(Kuwii ku dheereeyay «khayrka» ee horreeyay oo ka mid ah muhaajiriinta iyo ansaarta iyo kuwii ku raacay wanaagga Allaa ka raalli noqday iyana way ka raalli noqdeen, wuxuuna u darbay jannooyin ay socoto dheddooda wabiyadii iyagoo ku waari waligood, taasina waa liibaan wayn).

Waxaan qirayaan in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaan in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Intaas kaddib:

Alle (*subaaxanu watacaalaa*) wuxuu khalqigiisa ka doortay anbiyadiisa iyo rusushiisa, Alle wuxuu yiri – *subxaanahu* –

(اللَّهُ يَصْطَفِي مِنَ الْمَلَائِكَةِ رُسُلًا وَمِنَ النَّاسِ إِنَّ اللَّهَ سَمِيعٌ بَصِيرٌ)

(Alle wuxuu ka doortaa malaa'igta rasullo dadkana (rasullo) Ilaahayna waa maqle arka),

Wuxuu u doortay Alle rusushiisa dad ku caawinaya gaarsiinta risaaloo yinka rabbigooda, Alle wuxuu u doortay nabigiisa dad saafi ah iyo asxaab khayr leh oo isaga rummeeyay una gargaaray sidoo kale raacay nuurka lagusoo dejiyay, wuxuu leeyahay Ibnu Mascuud -Ilaahay raalli haka noqdee -: (Ilaahay wuxuu eegay quluubta addoomaha wuxuu arkay qalbiga Muxamed - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - inuu yahay kan ugu fiican, marka naftiisa ayuu doortay risaaladiisana ayuu lasoo diray, kaddib wuxuu eegay quluubta addoomaha qalbiga Muxamed - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - kaddib wuxuu arkay quluubta asxaabiisa inay ugu fiican yihiin, marka wuxuu ka dhigay taageereyaasha nabigiisa, diintiisa ayay difaacayaan, wixii muslimiinta ay u arkaan wanaag, Alle agtiisa wuxuu ka yahay wanaag, wixii ay u arkaanna inuu xun yahay, Alle agtiisa wuxuu ka yahay wax xun) Waxay ahaayeen asxaabta dadka kuwa ugu run badan xagga iimaanka uguna cilmi badan uguna fahan fiican uguna

camal wanaagsan, waxay u qaadaan bandiirada diintan adduunka dacalladiisa si xigmad leh iyo waanada wanaagsan, waxay gaarsiiyeen risaalada rabbigooda sida ugu fiican waxay mustaysteen inay noqdaan kuwa Ilaahay u doortay nabigiisa, Ibnu Cabbaas waxaa laga wariyay – *Ilaahay raalli haka noqdee* – oraahda Alle:

(قُلْ أَحْمَدُ لِلَّهِ وَسَلَامٌ عَلَىٰ عِبَادِهِ الَّذِينَ اصْطَفَنَّ)

(Dheh mahad Allaa iska leh nabadgalyana ha ahaato addoomadiis uu doortay korkooda), in laga wado asxaabta nabiga - *naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee*, lyaga waa kuwa manhajka islaamka kasoo qaatay meeshiisa saafiga ah jidkiisa toosanna aan ka leexanin.

Noloshooda waxaa ka buuxa muuqallada ifaya oo sugay dabbaqidda camaliga ah ee islaamka saxa ah. waxaa ka mid ah: naxariista nabiga, wuxuu ku abuuray asxaabtiisa dabciga naxariista, waxaa ka mid ah waxa ka sugnaaday sayidkeena Cumar bin Alkhaddaab -Ilaahay raalli haka noqdee - markuu arkay Cuyayna bin Xisn maalin asoo dhunkanaya ilmihiisa mid ka mid ah asoo dhabtiisa saaray, wuxuu yiri Cuyayna: ma dhunkanaysaa adoo amiir al-mu'miniin ah? haddii aan amiir mu'miniin ahaan lahaa ma dhunkan lahayn ilmo, wuxuu yiri Cumar maxaan samaynayaa haddii Alle uu naxariista qalbigaaga ka saaray, Alle wuxuu uun u naxariistaa addoomihiisa kuwa naxariista badan, mowqifkan wuxuu kaga dayday

sayidnaa Cumar nabi Muxamed - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wixii dhex maray nabiga iyo Aqrac bin Al-xaabis markuu nabiga ku dhunkaday agtiisa Xasan bin Cali -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri Al-aqrac: waxaa ii jooga toban caruur waligaygana hal ka mid ah ma dhunkanin, wuu eegay rasuulka kaddib wuxuu yiri: (**qofkaan naxariisanin looma naxariisanayo**).

Sidoo kale waxay ahaayeen tusaale lagu daydo xagga cafiska iyo masaamaxa, waxaa ka mid ah muuqaallada ugu sarreya wixii ka sugnaaday sayidkeena Abuubakar -Ilaahay raalli haka noqdee - markuu cafiyyay Misdax bin Uthaatha, wuxuu ahaa mid qaraabanimo iyo faqri awgood u biilo, Misdaxna wuxuu ka mid ahaa dadkii ka hadlay beentii laga sheegay Sayida Caa'isha -Ilaahay raalli haka noqdee -, markii Ilaahay soo dejiyay inay bari tahay Abuubakar wuxuu rabay inuu ka istaago waxsiinta Misdax, Alle wuxuu soo dejiyay:

{وَلَا يَأْتِي أُولُو الْفَضْلِ مِنْكُمْ وَلَا يَأْتِي أُولُو الْفَضْلِ مِنْكُمْ وَالسَّعَةُ أَنْ يُؤْتُوا
أُولَئِي الْفُرْبَى وَالْمَسَاكِينَ وَالْمُهَاجِرِينَ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَلَيَعْفُوا وَلَيَصْنَحُوا أَلَا
تُحِبُّونَ أَنْ يَغْفِرَ اللَّهُ لَكُمْ وَاللَّهُ عَفُورٌ رَّحِيمٌ}

(Yeyna ku dhaaranin kuwa fadliga (dheeraadka) leh iyo hodanimada inayan wax siinayn qaraabada, masaakiinta iyo kuwa ku hijrooda jidka Alle, hana iska cafiyaan hana saamaxeen, miyeydaan jeclayn inuu idiin

dhaafo Alle, Ilaahayna waa dhaafe naxariista), wuxuu yiri Abuubakar: haa waxaan jeclahay in Ilaahay ii dhaafo, wuuu usoo celiyay Misdax wuxuu siin jiray asoo leh: wallaahi mar dambe kama joojinayo.

Waxaa ka mid ah: himada sare iyo ku tartanka khayrka, waxay asxaabta ka barteen nabiga himada sare iyo in lagu tartatmo khayraadka iyo raadinta waxyaalaha sarreeya, wuxuu yiri rasuulka:

(...فَإِذَا سَأَلْتُمُ اللَّهَ ، فَاسْأَلُوهُ الْفِرْدَوْسَ ، فَإِنَّهُ أَوْسَطُ الْجَنَّةِ ، وَأَعْلَى^١
الْجَنَّةِ - أَرَاهُ - فَوْقَهُ عَرْشُ الرَّحْمَنِ ، وَمِنْهُ تَفَجَّرُ أَنْهَارُ الْجَنَّةِ)

(... haddii Alle aad wax weyddiisanaysaan weyddiiya Firdowsa maxaayeelay waa jannada dhexdeeda waana tan ugu sarraysa - waxaan fliayaa - korkeeda inuu yahay carshiga raxmaanka waxaana kasoo burqada wabiyyada jannada), arrintan waxay ka dhigtay asxaabta nabiga sharafta badan kuwa u hanqaltaaga arrimaha sarsarreeya wax walba, wuxuu leeyahay sayidkeena Cumar: (wuxuu na amray rasuulka maalin inaan sadaqaysano wuxuu kusoo aaday arrinkaas anoo hanti haysta waxaan iri: (maanta Abuubakar ayaan la tartamaya, waxaan keenay hantitayda nuskeeda, wuxuu yiri rasuulka: (**Maxaad usoo reebtay ehelkaaga?**) waxaan ku iri: intaas oo kale, wuxuu yiri: Abuubakar

ayaa la yimid wax walba uu haystay, rasuulka ayaa ku yiri: (**Maxaad usoo reebtay ehelkaaga?**) wuxuu yiri: (waxaan usoo reebay Ilaahay iyo rasuulkiisa, waxaan iri: mar dambe kulama tartamayo).

Saxaabigan weyn Kacab Al-aslamiy -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: waxaan la joogay rasuulka Alle waxaan u keenay weysadiisa iyo dantiisa wuxuu igu yiri: (**Weyddii**) waxaan ku iri: waxaan ku weyddiinaya Jannada inaan kula saaxiibo, wuxuu yiri: (**arrintaas waxaan ahayn miyaa?**) waxaan iri: (**waa sidaas**), wuxuu yiri: (**naftaada igu kaalmeey sujuud badan**).

Waxaa ka mid ah: ka doorashada iyo dhowrsanaanta, Ansaarta waxay sameeyeen tusaalaha ugu fiican xagga ka doorashada, waxaa laga wariyay Abuu Hureyra - Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: nin ayaa u yimid rasuulka Alle, wuxuu yiri: rasuulkii Allow dhib ayaa i qabsaday, wuxuu u diray haweenkiisa agtooda wax kamsoo helin, wuxuu yiri rasuulka Alle: (**mala helaa nin martisooraya caawa oo Alle u naxariisanayo?**), nin ansaar ka mid ah ayaa istaagay, wuxuu yiri: waa aniga rasuulkii allow, wuxuu aaday ehelkiisa, wuxuu ku yiri xaaskiisa: waa martida rasuulka, wax haka reebanin, waxay tiri: wallaahi ma hayo cuntada ilmaha waxaan ahayn, wuxuu yiri: haddii ay caruurta casho u baahdaan seexi iina imow, feynuustana dami caawa caloosheena

ayaan dhuuqsanaynaa, way samaysay, ninkii wuxuu ku kalahay rasuulka Alle, wuxuu yiri rasuulka:

(لَقَدْ عَجِبَ اللَّهُ عَزَّ وَجَلَّ - أَوْ ضَحِكَ - مِنْ فُلَانٍ وَفُلَانَةً ، فَأَنْزَلَ اللَّهُ عَزَّ وَجَلَّ) : (وَيُؤْثِرُونَ عَلَى أَنفُسِهِمْ وَلَوْ كَانَ بِهِمْ خَصَاصَةً .

(Wuxuu la yaabay Alle ama la qoslay hebel iyo heblaay, wuxuuna soo dejiyay: **(waxayna naftooda ka hormariyaan (ay uga doori) dadkaas xataa hadday gaajo hayso).**

Mowqif fiican oo kulminaya ka doorashada oo ansaarta ay ku sugnaayeen iyo dhowrsanaanta muhaajirinta ay ku sugnaayeen, wuxuu u bandhigayaa sayidkeena Sacad bin Rabiic sayidkeena Cabdiraxmaan bin Cowf -Ilaahay raalli haka wada noqdee - inuu hantidiisa la qaybsado, sayidkeena Cabdiraxmaan wuxuu ku qaabilay dhowrsanaan, wuxuu ka dalbaday inuu suuqa tusiyo, wuu ganacsaday wuuna dadaalay ilaa uu ka mid noqdo dadka madiinia ugu hantida badan.

Waxaa ka mid ah in xaqqa loosoo laabto, waxay ahaayeen asxaabta kuwa ku dadaalo xaqqa, iskamana weynaysiin jirin inay usoo laabtaan, waxaa laga wariyay Abuu mascuud Alansaari Albadri -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: waxaan garaacayay addoon aan leeyahay, waxaan maqlay cod gadaashayda kasoo

^

dhawaaqaya: (ogow Abuu Mascuudow Ilaahay ayaa kaaga awood badan isaga), waan soo milicsaday waaaba rasuulkii Alle - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - waxaan ku iri: rasuulkii allow waa xor Alle dartii, wuxuu yiri: (haddaadan sidaas samayn lahayn naarta ayaa ku gubi lahayd) ama (ku taaban lahayd).

Waxaa ka mid ah oofinta ballanka, wuxuu ku abuuray rasuulka asxaabtiisa qiimaha oofinta ballanka iyo in lagu boorriyo ilaalintiisa, waa kanaa sayidkeena Mucaawiya bin abii Sufyaan -Ilaahay raalli haka noqdee - camali ahaan waxaa u dhexeeyay isaga iyo Ruum ballan, wuxuu doonay Mucaawiya inuu aado meel u dhow xuduudka Ruum markii ballanka uu dhamaadana inuu kediyo, waxaa soo haleelay qof ka mid ah asxaabta nabiga asoo dhahayo Allaahu akbar Allaahu akbar, way eegeen waaba Camr bin Cabsa Mucaawiya ayaa usoo diray wuu weyddiiyay: wuxuu yiri waxaan maqlay rasuulka Alle oo dhahaya:

(من كان بينه وبين قوم عهد فلا يشدّ عقدة ، ولا يحلّها حتّى
ينقضّي أمدّها أو ينبدِ إلّيهم على سواء)

**(Qofkii isaga iyo dad ballan dhex taallo, yuuna jiidin
guntinta yuuna furin ilaa ay muddada ka dhammaato**

9

**ama uu si laysla og yahay ugu tuuro), Mucaawiya wuu
soo laabtay.**

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay
ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

Walaalaha islaamka ahow:

Waxay ahaayeen asxaabta nabiga kudayasho wanaagsan xagga diinta in lagu camiro adduunka, mid kaste iyaga ka mid ah shaqo ayuu qaban jiray, wuuna sugi jiray waxaa

iyaga ka mid ahaa ganacsade iyo hoggaamiye iyo aqoonyahan iwm. wuxuu yiri rasuulka:

(أَرْحَمُ أُمَّتِي يَا مَتِي أَبُو بَكْرٍ ، وَأَشَدُهَا فِي دِينِ اللَّهِ عُمَرُ ، وَأَصْدَقُهَا حَيَاءً عُتْمَانُ ، وَأَعْلَمُهَا بِالْحَلَالِ وَالْحَرَامِ مُعاَذُ بْنُ جَبَلٍ ، وَأَقْرُوهَا لِكِتَابِ اللَّهِ أَبِي ، وَأَعْلَمُهَا بِالْفَرَائِضِ زَيْدُ بْنُ ثَابِتٍ ، وَلِكُلِّ أُمَّةٍ أَمِينٌ ، وَأَمِينُ هَذِهِ الْأُمَّةِ أَبُو عُبَيْدَةَ بْنُ الْجَرَاحِ)

(ummadayda waxaa ugu naxariis badan Abuubakar, waxaana ugu adag diinta Alle Cumar, waxaa ugu run badan xagga xishoodka Cusmaan, waxaa ugu ogaansho badan xalaal iyo xaaraam Mucaad bin Jabal, waxaa ugu akhris badan kitaabka Alle Ubay, waxaa ugu aqoon badan xagga dhaxalka Zeyd bin Thaabid, ummad kastana waxay leedahay amiin, amiinka ummaddanna waa Abuu Cubayda).

Shaqooyinka asxaabta waxay lahaayeen miro fiican, nabigana wuu ku dhiirigalin jiray, wuxuu ku sheegi jiray qof kaste waxa ugu fiican uu sugayo, asoo sharfaya waxqabadkiisa waxaa ka mid ah wixii ka sugnaaday Cusmaan bin Cafaan maalintii Tabuuk markuu usoo

galay rasuulka asoo wato kun diinaar, wuxuu ku shubay dhabta rasuulka, wuxuu yiri rasuulka:

(مَا ضَرَّ عُثْمَانَ مَا عَمِلَ بَعْدَ هَذَا أَبَدًا)

(Walagii ma dhibayo Cusmaan wuxuu sameeyo kan kaddib).

Waxaa ka mid ah raadinta xalaasha iyo cabsida Alle amuuraha oo dhan, waxaa ka mid ah wixii ka sugnaaday sayidkeena Jariir bin Cabdillaahi -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu amray khaadimkiisa inuu usoo gado faras, seddex boqol dirham ayuu faras ugu soo gaday, wuxuu ula yimid faraska iyo qofkiisa siduu lacagta u siiyo, wuxuu ku yiri Jariir ninka farska lahaa: faraskaaga ayaa ka khayr badan seddex boqol dirham, ma ku iibinaysaa afar boqol dirham? wuxuu yiri: taas waa xaggaaga, wuxuu yiri: faraskaaga ayaa ka khayr badan arrinkaas, maku iibinaysaa shan boqol dirham? kaddib wuu kusii kordhinayay boqol boqol ilaa ay gaaraan siddeed boqol wuuna kaga iibsaday, waa lagala hadlay arrintaas wuxuu yiri: (nabiga waxaan kula ballamay inaan u nasteeexeeyo qof kaste oo muslin ah).

Qof kaste iyaga ka mid ah wuxuu garan jiray waxa laga rabo wuuna gudan jiray, wuxuu leeyahayna ma dhaafi jirin sayidkeena Abuubakar wuxuu u dhiibay sayidkeena Cumar qadaha (garsoorka), saydinaa Cumar wuxuu joogay sannad dhan oo aan qof u imaanaynin, markaas

wuxuu ka dalbaday inuu ka casilo Abuukar qadaha, wuxuu yiri: ma dhibka qadaha ayaad u doonaysaa in lagaa casilo Cumarow? wuxuu yiri Cumar: maya Khaliifaha rasuulkii allow, laakin iima baahna dad mu'miniin ah, mid kaste wuxuu ogaaday wixii xaq ah uu leeyahay, ma uuna dalbanin wax ka badan, wuxuuna ogaaday wixii waajib saaran ma uuna ka gaabinin gudashadiisa, mid kaste wuxuu ula jeclaaday walaalkiisa wixii naftiisa uu la jecel yahay, hadduu ka maqanaado way raaraadiyaan, hadduu xanuunsadana way booqdaan, hadduu waxbeelana way kaalmeeyaan, hadduu wax u baahdana way u kaalmeeyaan, hadii wax ku dhacana way u tacsiyeeyaan, diintooda waa nasteexo, dabcigoodana waa amarka macruufka iyo reebidda munkarka, ee maxay ku doodayaan ee maxay ku doodayaan?.

Maxaa inooga baahi badan inaan u laabano akhlaaqda dadkan suuban oo ka mid ah asxaabta rasuulka Alle, inaan ku dhaqanno akhlaaqdooda iyo inaan muujino muuqaalka saxa ee diinta Islaamka, diinta naxariista iyo maxaamaxaadda iyo dadnimada, dadkoo dhan Ilaahay nabadgalyo ha siiyo.

Ilaahayow noo ilaali dalkeena iyo waddankeena iyo shacabkeena iyo ciidankeena iyo nabadsugiddeena

**Masarna nooga dhig bashbash iyo barwaaqo iyo
dhammaan dalalka dunida**